Hooyada uurka leh waxaa lagu aragaa dhabar xanuun saaid ah xiliyadda ay ku jirto bisha 5 ilaa 9

Barar

Qofka dumarka ah marka ay gaarto bisha 7 ilaa 9 waxaa ku soo baxa barar dhanka gacmaha iyo cagaha waxana keena misaanka oo siyaada ama fadhiga badan.

Laabjeex

Laabjeexa waa mid saameyn weyn ku leh hooyada uurka leh xiliyadda cuntada kadib iyo markii ay seexan rabto habeenkii ayey isku argaan laabjeexa.

Calool xanuun

Calool xanuunku waa mid markaasta lagu argo

hooyada uurka leh waxaana keena caloosha maqaarkeeda oo kala baxa iyo minka oo is balaarinaya sababtoo ah ilmaha ayaa ku kora minka dhaxdiisa.

Baabasiir

Baabaasiirku wuxuu ka soo baxaa qeybta danbe ee ugu hooseysa ee malawadka, Malawadka gudahiisa iyo banaankiisa waxaa ku yaal xidido iyo muruq jilicsan, xididadaas ayaa is xira oo dhiig ka soo buuxsama xiliga ay hooyada uurka leedahay waxaana keena in calool fadhi ama in minka cadaadis ku soo sameeyo malawadka.

Sidoo kale astaamaha lagu argi karo hooyada uurka leh waxaa kamid

Madax xanuun

_lugaha oo xidido waa weyn ka soo baxa

_daal joogta ah

_kaadi badan xiliga habeenka

_xanaaqa iyo dabeecada oo lunta

_hurda yari

_cabsi

Bararka cagaha xiliga uurka hooyada

Bararka cagaha wuxuu inta badan biloowdaa xiliga danbe ee uurka waxaana sababa qulqulka dhiiga oo siyaada iyo culeyska ilmaha bararkaas yimada xiliga uur wax dhibato ah makeeno haduusan lasoco calamado kale sida madax xanuun

Maxaa lagula tacaali karaa?

1. Iska yareey taaginida badan
2. Iska yareey waxyaabaha dhanaan
3. Luguha saar meel kore
4. Ha isisaarin lugaha marka aad fadhiso iyo marka aad jiipto
5. Xiro kabo aan taago la heyn
6. Cab biyo badan
7. Ha xirani dhar kuugu dhagan

Daryeelka hooyada uurka leh

Hooyadu marka ay uurka leedahay waxay ubahan tahay dar yeel ugooni ah sida ay u kobciso ilmahayda uurka kujira iyo caafimaadkeeda guud daryeel kaas waxaa kamid ah

1. In ay hesho hurdo kufilan ugu yaraan 8 saacadood
2. In ay cunto cuntooyinka isku dhali tiran

3. In ay cabto biyo kufilan malintii iyo habeenkii
4. Hooyadu waa in ay boqataa goobaha caafimaad si loola socdo caafimaad keeda
5. Hooyadu waa in ay cuntaa cunooyinka vitamin-ka leh
6. Hooyada uurka leh waa in ay iska ilaalisaa fadhiga badan istaaga badan iyo wax yaabaha culus
7. Lashee keeso dadka kuugu dhaw si aadan ula kulmin xanuunada ama buuqa maskaxda

Dilanka uurka:

hooyada caruurteeda ay kaga dhintaan uurka gudahiisa ama marka ay dhashaan wax yar uun kadib marka laga reebo cunuga ugu horeeya (Curadka)

Waxaan mooduucaan ku soo qaadanaynaa arimo muhiim u ah bulshada kaasoo dad badani aysan ka war haynin, siyaabo khalad ahne loo fasirto.

Waxaa casharkaan loo yaqaanaa "isqaadasho la'aanta dhiigga lamaanaha" waa cillad ka timaada nuuca dhiigga lamaanaha isqaba oo is diidan

taasoo saameyn ku leh cunuga ay dhali doonaan. Cilladaan waxaa afka qalaad lagu dhahaa "Rh Incompatibility".

Sida aan wada ognahay dhiigga wuxuu u kala baxaa "A, AB, B, O", kadibne mid walba waxaa loo sii kala qeybiyaa (+ iyo -), markaasi waxaa soo baxaya 8 nuuc oo kala ah "A+, A-, AB+, AB-, B+, B-, O+, O-".

Haddii aabo dhiigiisu yahay (+) uu guursado hooyo dhiigeedu yahay (-), kadibne hooyadu ay uurka ku qaado cunug aabaha ku dhiig ah oo (+) ah waxaa dhacda in cunugaasi uu badbaado marka ugu horayso maadaama dhiigga hooyada uusan ku baraarugin dhiigga uurjiifka, laakiin marka ay foolanayso ayaa labada dhiig isgaaraan, kadibne difaaca jirka hooyada ayaa heegan buuxa la galiyaa si wixii markaas ka dambeeyo hadday markale qaado cunug dhiigiisu yahay (+) in la weeraro isagoo uurka ku jira, sidaasne cunuga ku dhex dhinto minka gudahiisa bilaha dambe uurka ama markuu soo baxo maalmo ka dib. laakiin hadduu

uurjiifka ku dhiig yahay hooyada (-), wuu badbaadaa.

Cilladaani waa mid caalamku u wada siman yahay, waxaana looga hortagaa in hooyada la siiyo cirbad tallaal oo kale ah bilaha ugu dambeeyo uurka ama isla marka ay dhasho si difaaca jirkeeda loo hilmaansiyo dhiigga uurjiifka, sidaasne uurka xiga ku badbaado.

Nasiib xumo hooyooyina badan lama soo xiriiraan xarumaha daryeelka hooyada iyo dhallaanka amaba lagama helo meelaha ay ku nool yihiin sidaa darteed arintaan dad badani kuma baraarugsana, hooyooyin badanne way ku waayaan caruurtooda iyagoo aan ogayn, waxaana dhimashada caruurtaasi isku xigxiga loo saariyaa in hooyada la sixray, la ileystay ama jinni hayo, khaasatan markuu ninka guursado haween kale oo ay u dhasho ilmo caafimaad qaba.

Way dhib badan tahay in waalidiintaas laga dhaadhiciyo in cillad nuucaan ahi inay jirto taasoo

keeni karta in ilmuhu dhiman doonaan, sababtoo ah waxaa lagu arki karaa qof ka hadlayo arrimo qarsoon oo Alle u gaar ah.

Dhibka kale oo jira ayaa ah in cirbadaan qaali tahay, dadka badankoodne aysan awoodin, meel kastane aan laga heli karin, una baahan tahay in lagu xifdiyo qaboojiye.

Haddii hooyadu uur qaado iyadoo aan cirbadaas la siinin, waa inay la soo xiriirtaa xarumaha caafimaadka laga helo dhakhtar ku takhassusay uurjiifka iyo dhallaanka, sababtoo ah waxaa laga yaabaa uurjiifkaasi in dhiigayri aad u daran ku dhacdo, markaasne u baahdo in dhiig lagu shubo isagoo uurka ku jira ama in qaaliin lagu dhaliyo waqti hore si loo badbaadiyo haddii sambabadiisu ay koreen.

Fadlan haddii aad garanaysid hooyo caruur isku xigxiga iyagoo mayd ah dhashay ama foosha ka dib dhinteen ku wacyi geli jiritaanka xaaladaan si ay

dhakhtar u la xiriirto loona baaro nuuca dhiigeeda
iyo kan ninkeeda.

Dhaqdhaqaaqyada ilmaha kujira uurka

Inta lagujiro sadaxda bilood ee ugu horeysa uurka,
waxaa laga yaabaa in aad dareentid dhaqdhaqaaq
badan oo dhanka caloosha ah sida , haraanti badan,
is wareejin, isrogid, hiigasho,

Marka aad lasocotid tirada dhaqdhaqaaqyada
ilmahaaga maalin kasta waxa aad baran doontaa
qaabka firfircoonida ilmahaaga uurka kujira, taasi
waxay gagar kageysan kartaa inay kuu digto hadii
ilmuhu aanu dareen sanen ficii naan

Tirada dhaqdhaqaaqa ilmaha:

Ilmao kastaa oo uurka kujiro waxa uu leeyahay
leeyahay waqtito hurdo iyo waqti uu soo tooso oo
caadi ah sidaas daraadeed ilmuhu waxay lahaan
karaan waqti daganaan iyo waqti firfircooni
dhaqdhaaqa waxa uu noqonkaraa haraati,
iskalabixin.dhinacjeesi. ama isrogid

Iskudarka 10 ama ka badan oo ah dhaqaaqyo
kalabaxsan oo labo saacadood ah waxaa

tilmaamaysaa in ilmahaagu fiicanyahay.hadii ilmahaagu uu dhaqaaqo in kayar intii caadiga ahayd waxay taasi calaamad utahay in uu kujiro dhibaato, ama ay dhibaato ubilaabmeso

Hadii aadan dareemin hilmaha uurka kujiro oo dhaqdhaqaaqaya in muda ah , cun in cunta iyo biyo hadii adaan dhaqdhaqaaq kadareemi mudo 1 halsaac ah booqo xarumaha caafimaadka gar ahaan xarumaha hooyada iyo dhalaanka

Dilaac minka =Rupture of uterus

Dilaaca minka kuyimaada waxay dhibaato ugeeysataa hooyada iyo cuniga kujira minka gudihiisa taas oo intabadan hooyadu ka dareento xanuunka maqaarka kore ee jirka waxaana lagu garankaraa

Dhiigbax

Uurkujirta oo xanuunta

Mamar oo dhiiga kukaca marka hooyadu tahay ugubka

F.G .hasameyn vaginal examination marka ay bukaanka kutimaado marxalada loo yaqaano

bleeding in latency.(dhiig bax qarsoon.) sababtoo
ah waxaa dhici karta dhiig bax culus

Xalka

Waxaa wanaagsan in bukaan ka lugu arko mar
xaladaas loo gudbiyo hospital-ka si uu uhalo
daryeel wanaagsan hadii uu san halin bukaanka
daryeel wanaagsan waxaa dhici karta in uu udhinto
dhiigbax daran

Caqabadaha xiliga uurka ee dumarka

1. Caqabadaha xiliga uurka
2. Xilga dhalmada
3. Dhalmada kadib

Caqabadaha xiliga uurka

Hooyada inta ay uurka leedahay waxay la kulantaa
caqabado badan sida

Nafaqo daro

Dhiig la'aan

In ilmuhu kasoo dhacaan hooyada

Barar kuyimaada jirkeeda

Sonkorta kudhacda dumarka xiliga uurka

Dhiig-karka uurka

Xiliga dhalmada

Dhiigbax

Qaliin

Tabardari

Iskudhimasho

Iskufuran

Dhalmada kadib

Dhiigbax

Qandho farabadan

Mindhicir xanuun

dhalitaanka ilmaha =Child birth

Waa dhamaadka xiliga uurka oo ay hooyada ilmaha kusido caloosha ay kasoodhaqaaqaan minka una soo dhaqaaqaan kafka

Types of child birth

Vaginal Delivery

C-section

Vaginal delivery

Waa marka uudhasho isaga oo soomarayo wada dhalmada birth canal. Ee hooyada waana dhalmada ugubadan ee la arko

Caesereac section

Waa qaliinka xilga dhalmada mana ahan mid
marwalba loo bahanyahay xiliga dhalmada

fool =Labour

Hooyada marka ay foolaneyso sadax marxaladood
ayey martaa oo kala ah

Early labour

Active labour

Transitional stage

Early labour

Waa marka uu nabarka qabto hooyada kadibna
biyaha ama fixda kadilaacdo waana marka uu kafka
isku diyaarinayo dhalmada marka lagu guudajiro
marxaladaan waxay qadankartaa 20 daqiiqo qeyb
ahaan kafka ayaa furma ilaa iyo 3cm

Active labour

Marxaladaan waxaa sii soconayo furitaanka uu sii
furmayo kafka waxa uuna sii furmaa ilaa iyo inta uu
ka gaarayo 10 centimeter

Transitional stage

Waa marxaladda sadaxaad ee ugu danbeysa oo

ilmaha kudhalanaya kaddibna looga soo saarayo
mandheerta iyo qashinka kujira

Foosha waa marxalada ugu horeysa ee dhalmada
waxayna dhamaataa marka aysoo baxaan ilmaha
dhalanaya foosha waa marxalada ugu adaeg ee
hooyada gasho dhalmada waxaa ka qeyb qaata
hormone waqtiga dhalmada kahor sidoo kale
qanjirka loo yaqaano pituitry gland ayaa soosaara
hormon-ka layiraahdo (oxytocin) kaasoo firfircooni
galiya minka si uu usoosaaro ilmaha dhalanya
waana hormone-ka ugu horeeya ee masuulka ka' ah
foosha sidoo kale imaanshaha foosha waxaa
cawiya dheecaan looyaqaano (prostate hormone)
foosha waxey uqeebsantaa labo qeybood oo kala
ah normal labour iyo prolong labor foosha waxey
leedahay sadax mar xaladood oo kala ah

first Stage

Second Stage

Third Stage

First stage of labour

Heerka koowaad ee foosha waxuu bilaawdaa
marka la arko calaamadaha foosha wuxuuna

dhamaadaa marka ilma galeenka uu bilaabo kala fiditaanka ilaa uu kawada furmo celcalis ahaan wuxuu gaaraa maraka loo eego gabadha aan horay udhalin 7-8cm hooyada horay u soodhashay wuxuu gaaraa 8- 12cm heerka koowaad ee foosha hooyadu waxey dareentaa xanuun yar

Secon stage of labour

Heerka labaad ee fooshe waxa uu bilaawdaa marka uu ilmuhu soobaxo heerka labaad ee foosha hooyadu waxey dareentaa nabar xanuun badan taas oo sababta soo bixitaanka ilmaha waxaana dhici karta hooyadu in ey kudaahdo foosha

Third stage

Heerka sadaxaad ee foosha waa soo bixitaanka ibida iyo man dheeta hadii aad aragto ibida iyo xuub keeda waa sidii loobah naa sidooka marka ay soobaxdo ibida cunuga waxaa kuxiran mandheerta waana in aad kataxadartaa

Keenista foosha

Waa habka gagaarka in fooshu bilaabato kahor inta

uusan iskii ubilaabin waxaa laga yabaa in daryeelaha ama dhaqtarka uu kufikiro in foosha laga keeno hadii taasi ay yareynayso qatarta ku imaan karta hooyada ama ilmaheeda foosha waxaa lgu keenaa marka la isticmaalo daawooyin ama qalab gaar ah badanaa waxaa lag burburiyaa xabka waxaa kale oo loo yaqaanaa jeexida xuubka (amniotomy) iyadoo sababtu ay tahay halista ka imaan karta, waa in fool kenistu lasameeyaa kaliya markii ay jiraan sabobo cafimaad oo caqli gal ah oo aykujiraan uurku waa in uu dhafay xiligii loogu talagalay dhalmda ,waaxaa laga yaabaa hooyada ama ilmaha leeyihiin dhibatooyin caafimaad oo ay kadhalintu waxtari doonto uurka uguyaraan waxa uu garaa 39 isbuuc isla markaana afka ilma galeenkuna waxa uu diyaar uyahay dhalid sidaas daraadeed hadii uu dhaafo waqtii loogu talagalay waxaa lama huraan naqondoonto in la isticmaalo fool keenista

Waamaxay halista fool keenista

Daawooyinka loo isticmaalo si foosha loo keeno waxaa kamid ah ocytocin waxaa kale oo looyaqaan

pitocin taas oo qasab kadhigaysa in hooyada iyo ilmaheeda sitaxadar leh loola socdo si looga hortago dhibaatooyinka ey leedahay qabashada foosha ocytocin waxaa lagu bilaabaa qadar qaadasho oo yar si qabashooyinka foosha ay si tartiib ah kuugu bilaab maan afka ilma galeenka oo jileec noqdaa kahor fool keenista waxey yareen kartaa waqtiga fooshe

Cytotec kaiini gaan yar waxaa ladhigaa meel udhaw afka ilmo galeenka si loo jilciyo. Marka lasiiyo dawadaan waana in lalasocdaa hooyada iyo ilmaheyda mararka qaarkood waxaa laga yabaa in ay foosha bilabato marka lasiiyo cytotec(R) = (cervidil(R) kaniinigaan wuxuu kudhax jiraa maro shaandho ah oo jilicsan kaniinigaan waxaa ladhigaa meel udhaw afka ilmo galeenka si loojilciyo waxaad ubaahantahay lasocod joogta ah marka lasiinayo dawadaan hooyada foosha ah

Buufinta bisleynta (ripening balloon) daryeelaha cafimaad waxa uu buufin yar oo la afuufi karo kalinayaa meel yar oo ah gudaha afka ilma galeenka kadibna waxa uu buufinayaan buufinta

tubooyinka qaarkood waxay leeyihiin labo buufin
Ocytocin dawadaan waxay ubaahantahay faleembo
(iv infusion) dawadaan waxaa loo isticmaalaa in
lagu bilaabo foosha

Prolong labour

Foosha kabadata waqtigeeda caadiga ah ayaa
waxaa loo yaqanaa prolong labour in hooyooyinka
qaarkood ee fooshu kudheeraato waxaa keeni kara

Canuga oo kaweynaada marinka dhalmada
ama si qaldan uyaala

Erno kutaala caloosha dhaxdeeda

Buro kutaala minka

Marwaliba waxaa muhiim ah in ay umulisada
koontoroosho marxaladahaas oo dhan
umulisooyinka marka ay gartaa in aysan hooshaan
aysan qabankarin waxaa muhiim ah in ay
ugudbiyaa cusbitaalka si ay uhalaan daryeel
dheeraad ah

Delivery

Dhalmo waamarka hooyada canuga caloosheeda
kujiro oo kasoobaxo sidookale waxaa furma minka
afkiisa hore hoormoonada qaar waxey bilaabaan

dhaqdhaqaaq waxaana loo qabiyaa labo qeybood
oo kala ah

Normal delivery

Abnormal delivery

Normal delivery

Waa dhalmada caadiga ah uu canuga yahay madax
keen kasoo sidagdag ah usoomara ama uga
soobaxa kanaalka, hooyaduna madareento wax
dhibaato ah waxaana lagu dhalin karaa xarunkasta
oo cafimaad ooleh umuliso midwifery umulisada,
waa in ay kuda daashaa hoyada uurka leh
dhalmada kahor iyo kadiba

Sawiro

Sawero

Sawro

Sawiro

Sawiro

Delivery of twins



Dhalmada mataanaha waxay lamid tahay tan kaligeed ah waayo marka hooyada foosha utimaado caawisaa cunugeeda koowaad waana in ay umulisadu udhalisaa sidii ay udhalinjirtay halka cunug marka uu cunuga koowaad yimaado waa in kankale loo sugaa ilaa iyo 30daqiiqo si ay fooshiisu utimaado, hooyada kadib. Baar hooyada xaladeeda

Abnormal delivery

Waa mid qatar ah waxaana lagayaabaa in canuga uu yahay mid daba keen ah ama garab keen ah sidoo kale wuxuu naqon karaa mid kaweyn marinka dhalmada marxaladaan waxaa sababikara miskaha oo ah kuwo cabirkoodu yaryahay oo ilmuhu soo dhaafi waayaan hadii umulisa ay waxka qaban weeyso ama aysan la heyn xirfada qalinka waa in ay ugudbisaa cusbitaalka si loosiyo daryaal

wanaagsan

Placenta = mandheer



Mandheerta waa xubin kusameysanta gudaha ilmo galeenka inta lagu guuda jiro waqtiga uurka . mandheerta waxey ogsijiin iyo nafaqo siisaa uurkujirka sidoo kale waxey saartaa wasaqda uurjiifku soobixiyo. Mandheerta waxey isku xirtaa jirka hooyada iyo kan uurjiifka. Intabadan mandheerta waxay ku dhagantahay qeybta kore ama minka .

Waa marka ay mandheerta kasoo go,do qaybta hoose ee ilmagaleenka inta badan waxey sababtaa dhiigbax daran waxeyna dabooshaa cervix –ka placenta-ha waxaa loo qaybiyaa sadax qaybood oo

kala ah

Low implanted placenta

Partial placenta previa

Total placenta previa

Mandheerta is hortaagta soo bixitaanka uurjiifka

Waxay dhacdaa marmar in mandheerta ay qeyb ama gabi ahaanba ay daboosho

ilmo maeenka hooyada. Mandheerta is hortaagta soobixitaanka uurjiifka waxay sababi kartaa dhiigbax dhaca xiliga uurka iyo xilga dhalmada

After delivery Care of the Baby =Daryeelka canuga dhalmada kadib

Uga taxadar si aysan qabow ugudhicin

marka ugu horeyso oo uu canuga dhasho useexi dhabarka madixiisana ufoorari

Kanadiifi xabka indhaha afka iyo sankaa

Marka ay xudunta xanuunka deyso ugoy si taxadar leh

Management of delivery = maamulida dhalmada

Saaxi cusbitaalka

Siicabitaan badan

Hasiin cuno adag

Qor magaca hooyada

taariiqda

Maalinta iyo waqtiga dhalashada

Waamaxa xanuunka isku furanku (obstetric fistula)

Isu –furanku waa dhaawac soo gaara xubnaha taranka ee hooyada xiliga umusha dhaawacaas oo keena inuu isku furmo xubnaha taranka ee markii hore kala xirnaa

Maxaa keena isu- furanka (obstetric fistule)

Waxaa keena fooha oo ku dheerata hooyada xiliga dhalmada , ama madaxa canuga oo cadaadis saara xubnaha taranka ee hooyada cadaadis kaas oo udiida in xubnaha muhiimka ah ee hooyada uu soo gaaro dhiig kufilan taas oo keenaysa in y dalooshanto una dalooshanto xubinkale oo aan loogutalagalin in ay isu-furnaadaan. Tusaale sida dabada iyo saaxaha

Qeebaha isu-furanka= Types of obstetric fistule

1. Isu-furan kudhaca kaadi haysta iyo xubnaha taranka ee makaanka (uterus/cervix) ama saaxaha (vagina)
2. Isu-furan kudhaca malwadka (rectum) iyo

xubnaha taranka (vagina)

Maxaa looga hottagi karaa dhicitaanka isu-furanka?

.Hooyada oo xananada lasocota inta ay uurka leedahay

. foosha iyi umusha oo ay fuliso umuliso tababaran oo garan karta marka ay fooshu kudheeraata hooyada una gudbin karta meesha iyo cida wax uqaban karta hooyada iyo ilmaha Da'da yar ee ay habluhu ku kuursanayan, sababtoo ah miskaha ayaana gaarin heer uu ilmo soodhaafi karo

Yuu kudhici karaa isu-furanka?

Hooyo ksta oo fooshu kudeeraato wuu kudhikikaraa, lakiin wuxuu ubadan yahay ugubka

Wax malaga qaban karaa marka uu dhaco isu-furanka?

1.Marka ugu horeeysa ee la ogaado isku-furanka umusha kadib (nooca kudhaca kaadi mareenka iyo xubnaha taranka) waxaa lagaliyaa cinjirka kaadida (catheter) oo kaadi kasoo qaata mudo 4 usbuuc ah iyadoo kadib la eegayo in daloolkii sooyaraaday ama xirmay. Hadii wali kaadidii socoto waxaa loo sameeyaa qaliin

2. hadii uu yahay nooca kudhaca malawadka waxaa lagu xaliyaa qaliin oo kaliya

Xanuunada maskaxeed ee hooyada umusha kadib Dhibaatooyinka maskaxeed ee hooyooyinka kudhaca umusha kadib waxay kamid yihiin dhibaatooyinka uguyar tiro ahaan marka loo eego xanuunada kale, waxay gaar uyihiin hablaha gaar ahaan kuwa ugubka ah 80% boqolkiiba

Xanuunkan wuxuu dhacaaa labada todobaad ee ugu horeeya ee umusha kadib

Dhibaatooyinka maskaxeed ee umusha kadid sadax loo qeebiyaa oo kala ah

Hooyo oo oohin badan iyada oo aynan jirin dhibaato kale

Niyad jab umusha kadib

Xanuun maskaxeed 40-ka intey kujirto hooyadu

Waxyaabaha keena :

Guud ahaan lama yaqaano waxyaabaha keena dhibaatooyinka maska xeed ee umusha kadib balse waxaa larumeysan yahay inay kiciyaan sida kadiska ah ee ay hoos ugu dhacaan dheecaamada uurka,

dhicaanmada loo yaqaano (Progesterone, iyo Oestrogen)

Hooyooyinka unugul inay lakulmaan dhibaatooyinka waxaa kamid ah

1. Hadii ay hooyadu qabtay xanuun maskaxeed ama ama qof kamid ah qoyskeeda sida waalid keed ama walaala heed
2. Hooyo kastaa waxay u nugushahay in uu xanuunkaan uu ku dhaco.

Calaamadaha lagu garto

Hurda oo ay kuyaraato ama ay kubadato

Hooyada oo uu kudhaco niyad jab

Oo hin aan lagaraneyn sababta keentay

Hadalka oo daciif noqda

Xasuusta oo yaraata

Mararka qaar hooyadu waxay maqashaa

codkale

Daaweynta

In niyad dhis loo sameeyo

In loo sheekeyyo xiliyada qaar

In loo dheylotiro baahiyada gaarka ah

Nuujinta iyo uurka

Hooyo nuujisa hadii ay uur qaado waxaa waajib ku ah in ay joojiso nuujinta una soo jeedato midka caloosha kujira si uu u heli nafaqo kufilan.

Hooyada uurka leh haddii ay nuujiso waxaa nafaqo daro lasoo daristaa ilmaha uurka kujira iyo in uu koriinkiisa hoos udhac ku yimaado

Ilmaha nuuga hooyda uurka leh kamahelo nafaqo kufilan wuxuuna hooyada kanuuga dacar iyo biyo caano u eg oo aan nafaqo la heyn

Waxaa muhiim ah in hooyada cunto. Cabto cabitaan. Kufilan xiliga ay nuujineyso ama uurka ay leedahay si ay ugobcaan ilmaha kiliyihiisa iyo garaadkiisa

Muhiimad ugu weyn waxaa leh ilmaha uurka kujira si hooyadu udhasho ilmo caafimaad qaba. Oo u dhameys tiran dhinac walba

Hadiikale waxaa kadhalaan kara in hooyadu difaaceeda jirka uu hoos udhaco ayna kamuuqato diif iyo tabardaro ugu danbee ay sababto awood la aanta hooyada in ilmaha lagu soo qalo.

Faa iidooyinka caanaha

Canaha waxay faa ido weyn uleeyihiin canuga waayna kadifaacaan cudurada kala duwan ee soo weerari kara nooc kastaba ha ahaadeen waana in hooyada markasta waa in ay kudadaashaa nuujista ilmaha

Dhaawaca nasaha = Nipple wound

Dhaawaca kuyimaado ibta naasaha waxaa haboon in hooyadu ay nadiifiso naaskeeda ayna siiso cunugeeda naska kale ilaa iyo inta uu karaysanaayo ,ha u ogalaan inuu cunuga kuciyaaro naaska ama uu ku kor seexdo waayo waxaa jirankara naaska hooyada

Barararka naasaha =Engorgement

Marka naaska caano soobuuxiyaan ama uu lasoo bararo waxaa ku adkaanaysa in cunug cabo caanaha naaska marka in hooyada yareesaa canaha naaskeeda si ay ugu fududaato cabitaanka canaha canuga yar

Kasoobaxa naasaha =Nipple abcess

Hadii naaska uu ka soobaxo kasoo bax isla markaana uu dilaaco waa in aad si wanaagsan u dhaydaa kadibna sii anti biotic si loo qalajiyo

kasooobaxa

Habka xudunta looga gooyo mandheerta

Sooqaado labo xudun xire

Kaxir xudunta labada dhinaca

Soo diyaarso maqas ama sakiin kadibna sidaxadar

leh ugoy xudunta

FG: inta badan xudunta waxaa lagooyaa inta eysan

ibidu soobixin

Wamaxay uuryaal=uterine regression

Waa muruq. go kudhaca haweenka umusha taasoo

ay uguwacantahay ilma galeenka isku soo aruuraya

foosha kadib si uu ugu soo noqdo sidiisii dabiiciga

ahayd waxaa afka qalaad lagudhahaa uterine

involution ama uterine regression hooyadu waxay

dareentaa foosha kadib waana xanuun siyaado ah

dib ugurashada minka ama aruurka minka waxey

dan ugu jirtaa hooyada umusha waxeyna kamid

tahay naxariista rabi minka markuu isku soo

shuuqayo wuxuu bananka usaaraa wixii dhiicaan

gudihiisa kujiray , waxuu kaloo joojiyaa dhiig baxa

maadaama xididada afkoodu oodmayaan markuu

isku soo aruuro

Qatarta uuryaalka

Hadii ay hooyadu xanuunkaas dareemin oo
ilmagaleenku aruurin, waxay hooyadu qatar
ugujirtaa dhiig bax, wuxuuna xanuunka sii
darnaadaa markastoo horay u soodhashay
maadaama minka ay dabceen iyo markii aay
mataano dhashay maadaama minka ama ilma-
galeenkeedu uu aad ufiday ma ahan wax laga
walwalo ee waa xanuun lasugo oo la fisho daqtarka
waxaa laga yaabaa inuu kusiiyo daawo xnuun
baab'iso ah inta uu xanuunka kaatagayo

Astaamaha halista ah ee uurka

Hadii aad qabto ama aad lakulanto mid kamid ah
as taamahaan hoos ku xusan isbitaal gaar

Indho- madoobaad

Xanuun xilga kaadida

Xanuun joogta ah oo dhabarka hoose ah

Dhiig ama xijiro farjiga kayimmada

Qoyaan siyaado ah hoota kayimaado

Majuujin ama kor udhifasho ilmagaleenka'

Canuga oo dhaqaaqiisu yaraado

Matag ama shuban isku xig xiga

Suuxdi iyo siriirid

Dhiciska = Toxoplasmosis

Xanuunka loo yaqaano toxoplasmosis somaliduna utaqaaano dhiiga dhiciska, waxa uu kamid yahay xanuunada lakala qaado ee lagu magacaabo (zoonosis) toxoplasma oo ah noolaha sababa toxoplasmosis oo ah xanuun dadka kudhaca waana noole ku dunnool noole kale, xanuunkaan waxaa gudbiya mukuleesha ama yaanyuurta.

Dhibaatooyinka uu keeno toxoplasmosis-ka

Caabuqa kudhaca madaxa iyo xangulaha

Madaxa ilmaha oo barara

Araga oo yaraada

Muqaalka jirka oo liigta

Ilmaha oo soo dhaca ayaga oon dhameysan
bilihii

Ilmaha oo ku dhax dhinta caloosha

Dilanka joogtada ah

Dilanka joogtada ah waa cilad kutimaada qaab sameysanka xubnaha ugu shaqada leh uurka sida

Raximka

Afka ilmagaleenka

1. raximka : waxaa la arkay hadii minka u sameysanyahay qaab uusan uur kucashan karin boqolkii 15% ilmahaas way soo dhacaan , ciladahaas waxaa kamid noqonkara in minka uu leeyahay xuub kala qeebiya ama cilad muruqaha minka ah balse xaladaan waa mid lagu ogaankaroin baritaanokonbuyutar

2. Afka ilmo galeenka : hadii ee jirto dabacsanaan afka minka waxay keentaa in uur jiifka soodhaco markii uu cuslaado wuxuuna dilankaan badanaa dhacaa markii ilmaha ay ka gudbaan 3 sadaxda bilood ee hore . waxaana lagu ogaan karaa wisiteyn dacsanaanta afka minka , waxayna dhaqaatiirta toliin fudud ay ku qabtaan afka si ilmuhu udhameeysto bilooyinkiisa kadibna waa laga furayaa toliinkii

Ciladaha isdiidka hooyada iyo aabaha

Waxaa jira dad leh hiddo socod unugul in ay sootuuraan ilmaha, hadii ay isku soo aadaan labo qof oo xambaarsan hiddo sidaha isdiida , hiddo sidaha is diida wuxuu sababaa in ilmaha ay soo

dhacaan ayogoo aan bilo jirin, ama ay dhashaan ilmo aan dabiici ahayn , sidaas awgeed waxaa jira baaritaano ladhaho karyogram” oo lagu ogaado in labada lamaane ay qabaan cilada haas ciladaan waa mid caalamku uwada siman yahay ,

Sidaa looga hortagi karaa

Waxaa looga hortagi karaa in hooyada lasiiyo cirbada talaal oo kala bilaha ugu danbeeyo uurka ama islamarka ay dhasho si difaaca jir keeda loo hilmaansiyo dhiiga uur jiifka , sidaasna uuka xiga kubadbaado.

Nasiib xumoyinka badanaa lama soo xariiraan xarumaha daryeelka hooyada iyo dhalaanka amba lagama helo meelaha ay kunool yihiin sidaas daraadeed aritaan dadbadan kuma baraausana, Hooyooyinka marka ay qabsato mar xaladaan waxay mala awaalaan in dhimashada joogtada ah ee kutimaada ilmahooda ee sabab utahay in lasixray la ileystay ama jini hayo, qaasatan markuu nikeeda guursado haweenkala oo ay udhasho ilmo caafimaad qaba.

Uurka iyo daawada

Haii aad uur leedahay waa in aad ka fogaataa isticmaalka daawada uusan dhaqtar kuu sooqorin, isticmaalka daawooyinka qaar waxay saameeyn kuleeyihiin uur jiifka ama hooyada marka ay uur leedahay. Daawada ay hooyada uurka leh qaadato waxay ugudbaan ilmaha, kuwaasoo saameynta ay kuyeelan karaan ilmaha ay noqon karto:

- In ay dhashaan ilmo naafa ah
 - In ay saameyn kuyeeshaan nafaqda iyo hawada uu qaato canuga
 - In ay saameyn ku yeeshaan murqaha minka, kadibna uu giijismo taasoo keenta cadadaaiska kudhaca dhiig socodka ilmaha kadibna dhicisooba
- Saameynta daawda ay kuyeelan karto ilmaha uurka kujira waxay kuxirantahay

Xilga iyo marxalada koriinkooda

Nooca daawda laqaatay

Daawooyinka qaar waxay saameyn xun ku yeelan

karaan ilmaha isla markii ay galaan minka, qaar kalane marka ay dhashaan sidaas daraadeed waxaa jira daawooyin layaqaan oo dhoor ah taasoo wajib ah in haweenka uurka leh ay ka fogaadaan xiliga uurka waxaana kamid ah

1. Diazbam
2. Chloramphencol
3. Tetracyclin
4. Ciprofoloxacin
5. Naproxen
6. Aspirin
7. Ibuprofin
8. Methimazole
9. Heparin
10. Warfrin
11. kanamcin

Dhibaatooyinka ugu caan sa ee lakulmaan haweenka uurka leh

Walaac =morning sicnese

Daal = fatigue

Hurda oo dhib ah=trouble sleeping

Danqasho naasaha ah=tender Breast

Labjeex= hearburn

Barara gacmaha iyo cagaha =swilling of
hands and feet

Calool adag =constipation

Baabasiir= hemrrhoids

Xanuun caloosha ah =Abdominal pain

Dawaqid =dizziness

Hoolgabnimada dhalmada

Waa sadax qeeboo oo kala ah

Menopause

Perimenopause

Postmenopuase

Menopause:

Waa maxay hoolgabnimada dhalmada (menopuse)

Menopause waa hool gabnimada dhanka dhalmada
ama dhiiga caadada, waa nidaam biological ah oo
mar walba soo mara dumarka aduunka aaynu

kunool nahay, waxa ugu horeeya ay isku arkaan dumarka waxaa kamid ah xaalad dhalmo la, ah oo joogta ah ama dhiiga caadada oo ka istaago taas macnaheeda uu yahay in ay dumarka lasoo daristo xaalad ah in aysan dhalaaynin wax caruur ah ama aysan ama aysan qadaaynin wax uur ah, waxaana lagu ogaan kara xaladaan marka ay dumarka la soo daristo in aay iska waayso wax caado ah in kabadan 12 bilood oo xariir ah

Inta lagu jiro xaladaan kala wareega ah ee dumarka ay kawareegaan nidaamka dalmada una wareegan xaalada hol gabnimada dhanka dhalmada,

Ovarieska ama xubnaha sameeyso ugxanta ama hormoonka dumarka ayaa waxay bilaabaya in ay joojiyaan soo saarista in kufilan hormoonka dumarka estrogen iyo progesterone ama soo saarin ugxanta dumarka, marka hadii uu hoos udhaco hormoonka aan soo sheegnay estrogen iyo progesterone dumarka waxay u horseedaa in ay wayso dhiiga caadada uu ku dhaco dumarka bilwalba xalada hool gabnimada xaga dhalmada dumarka inta badan wuxuu kuyimadaa da,da inta

udhaxeesa 45 sani ilaa iyo 55 sano waa qofba sida uu ilahay ugu maneeysto, dumarka qaar ayaa holgabnimada ugu bilaaba 30 sano ama 35

2.Perimeno puase: holgabnimada kasoo hormarta waqtigeeda

Hool gabnimada dhalmada dumarka kaso hormarata waqtigeeda.howsheedu waxaay bilaabaneysaa sanadooyin kahor inta uu san imaanin holgabnimada jigtada ah waqtigeedi. Inta lagu jiro xaladaan soo hormaritaanka dhanka hool gabnimada. Si caadi ah ayeey dumarka u haleen dhiiga caadada, inta lagujiro xaladaan soo hormaritaanka waqtiga istaaga dhiiga caadada ama dhalmada qofta dumarka ah hormoonkeedu waxa uu noqonayaa mid aan daganeen ama waxa uu noqonayaa mid la fal galkiisu sareeyo ama hooseeyo

Postamenopuase: hol kabnimo kadib

Qofka dumarka ah marka ay kabaxdo marxalada dhalmada ayna gasho marxalada hool gabnimada ayaa waxaa ku dhaco is badal badan marba si kuyimaado dhanka jirka haweenka, maxaa yeelay

hormoonkeedii oo dhan ayaa baxa oo raaca
kaadida ay kaadiso mar kasto inta ay kujirto mar
xalada holgabnimada,

Symptoms : calaamadaha lagu arki karo

Lafa xanuun

Dhidid waqtiga habeenkii ah

Kileel

Kalshiyaamta oo kuyaraada

Qalabka dhalmada=Material of delivery

Waa aad diyaar sataa qalabka kuuku muhiimsan
xiliga dhalmada sida

Marooyin nadiif ah = Dressing

Sharooto = Scotch

Suuf = Cotton

Bacda qaliinka = posters

Dunta = Cut cut

Dhiig jojin = Vitamin k3

Gacmo gashi = Gloves

Maqasyo = Scissor

Needle holder

Binzo anotomy